Taageero Nidaam Lacag la´aan ah

Nidaamka Taageerida ah waa Arin la xaqiijiyay, taasoo Dhibanaha – Sharci ahaan loogu yeero Dhibanayaasha Dhibka, handadaada khatarta ah iyo/ama qaar ka mid ah kuwa ku Dhaawacmay Arimo Jinsiyeed owgeed, waxaa ay heli karaan Caawimaad Nafsada ah, Bulshada ah iyo Sharci ah, iyadoo bilaash ah.

Hadii lagu dhibaateeyo ama si khatar ah laguu handado, sabtuna ay tahay Aragaaga, Diintaada ama Arimo Jinsi ku saabsan, waxaad Xaq u leedahay in lagaa saacido Nafsada - Sharciga - iyo Nidaam-Taageero ah oo Lacag la´aan ah.

Nidaamka Taageerada Lacag la´aanta waxaad ka heli kartaa Xarumaha Badbaadinta Dhibanaha ee Magaaladu ictiraafsan tahay – sida WEISSE RING – Verbrechensopferhilfe (Caawinaada Dhibanaha Jariimada), sämtliche Gewaltschutzzentren in Österreich (Dhamaan Xarumaha Badbaadinta Dhibaatooyinka ee Ustariya), Männer- und Frauenberatungsorganisationen (Xarumaha Latalinta Raga iyo Dumarka).

Hadii aad wax Su´aalo ah qabtid ama Warar dheeraad ah oo ku saabsan Arimaha aad u baahan tahay, la xiriir Ururada Talo bixinta ee aad ku kalsoon tahay – sida ZARA - Zivilcourage & Anti-Rassismus-Arbeit(Geesinimo galinta Bulshada & Ka hortaga-Shaqada-Cunsirinimada), die Dokustelle – Antimuslimischer Rassismus & Islamfeindlichkeit (Ka hortaga cunsuriyeynta Muslimka & Cadaawaynta Islaamka), die Initiative diskriminierungsfreies Bildungswesen (Hindiso waxbarasho oo aan Takoor laheyn) iyo Xarumaha lidka Takoorka ee Steiermark, Wien, Salzburg iyo/ama Kärnten.

Halkan waxaa lagu gudbin doonaa Arintaada, iyada oo lagula talin doono, lana taageeri doono Dacwadaada, laguuna raaci doono Boliiska iyo/ama inaad caan ku noqotid Dacwadaada adiga oo ka raali ah – ama ay noqoto Dacwadaada mid qarsoodi ah, hadii aad sidaas rabto.

Diese Broschüre konnte im Rahmen des Projekts V-START – Victim Support Through Awareness-Raising and neTworking erstellt werden. Die Verantwortung für den Inhalt dieser Veröffentlichung tragen alleine die Verfasser*innen; die Europäische Kommission sowie das Sozialministerium haftet nicht für die weitere Verwendung der darin enthaltenen Angaben.

Co-finanziert durch das Justizprogramm der Europäischen Union

Bundesministerium Arbeit, Soziales, Gesundheit und Konsumentenschutz

Co-finanziert durch das Bundesministerium für Arbeit, Soziales und Konsumentenschutz

Yaan la xiriiri karaa?

Antidiskriminierungsstelle in der Stadt Salzburg
Kirchenstraße 34
5020 Salzburg
office@antidiskriminierung-salzburg.at

Antidiskriminierungsstelle Steiermark
Andritzer Reichsstraße 38/1.Stock
A-8045 Graz
T: +43 316 / 714 137
buero@antidiskriminierungsstelle.steiermark.at
www.antidiskriminierungsstelle.steiermark.at

AÖF – Verein Autonome Frauenhäuser
Bacherplatz 10/4
1050 Wien
T: +43 (0) 1 544 08 20
www.aeof.at
Khadka Caawinaada Dumarka dhiban
0800 222 555

Dokustelle – Islamfeindlichkeit & Anti-Muslimischer Rassismus
E-Mail: office@dokustelle.at
Tel: +43 676 40 40 005
FB/Dokustelle Österreich
www.dokustelle.at

Gewaltschutzzentren & Interventionsstellen Österreich
www.gewaltschutzzentrum.at

WEISSER RING – Verbrechensopferhilfe
office@weisser-ring.at
www.weisser-ring.at
Wacitaanka dagdaga ee dhibanaha
0800 112 112

ZARA – Zivilcourage & Anti-Rassismus-Arbeit
Schönbrunner Straße 119/13
Eingang: Am Hundsturm 7
A-1050 Wien
T: +43 (1) 929 13 99
office@zara.or.at
www.zara.or.at

WEISSER RING

DOKUSTELLE
Islamfeindlichkeit & antimuslimischer Rassismus

Antidiskriminierungsstelle Steiermark

ZARA ZIVILCOURAGE & ANTI-RASSISMUS-ARBEIT

V-START

Ka hortaga-cunsuriyeynta-Muslimiinta/ Cadaawaynta Islaamka

Maxa la sameyn?

Hadii aad tahay Qof ay dhibaato ka soo qaartay ku xukumid Dambi aan la hubsan, Jariimandaas oo ah Naceyb – *hate crime.*

Kaligaa ma tihid!

Ma lagu xumeeyay, ma lagu caayey, ma lagu weeraray, ma lagu dhaawacay ama hantidaada wax ma la yeelay waadna hubtaa inuu Dambiilahaas wuxuu uu u sameeyay Dambigaas, sababtuna waa inuu Dambiilaha uu go´annsaday hubsiinsho la´aan iyo Naceyb, kaa soo ku kalifay go´aamada aan lahubsan, go´aamadaas oo ku saleysan Fikrado Islaam Neceyb ah?

Tani waxey noqon kartaa Tijaabo aad uweyn oo ka duwan Dambiyada „caadiga" ah – hel taageero!

Waxaad rabtaa inaad wax ka qabatid mana tagaanid si aad wax uga qabatid? Ama waxaa tahay Qof si xun u dhaawacmay, oo doonaya in Talaabo Sharci ah ka qaado, Talaabadaa soo Wacyi galin ah iyo in ay Ficiladaas ahaayeen kuwa Musliminta lid ku ah?

Halkan waxaad ka heli kartaa Warbixin iyo Talaabooyin aad xulato ama doorato!

Muxu yahay ka hortaga Takoorida Muslimka | Cadaweynta Islaamka?

Takoorka Muslimka latakoorayo (oo loo yaqaano Islaamphobia {Cabsida laga qabo Islaamka} ama Islaam Takoorida). Waa nooc ka mida Takoorka, taasoo ku jeeda Dadka Diinta Islaamka heysta. Dadka la dhibaateeyo ama la takoorayo ma`aha Muslimiin oo kaliya lakiin waxey noqon karaan Dad u eg Muslimiin ama dhaqamada Muslimka leh iyadoo loo takoorayo in ay Muslimka u eg yihiin ama „Caadooyinka" Muslimka leeyihiin.

Dadka Muslimka ah ama Muslimiinta la moodo waxaa loola dhaqmaa si ka duwan ama ka xun Dadka kale iyadoo la fogeynayo, la reebayo ama la caayayo, la xumeynayo iyo/ama la weerarayo.

Maxey tahay Jariimada Naceybka ah – *hate crime?*

→ „Jariimooyinka Naceybka ah – *hate crime* waa Falal dambiyeed ku saleysan Ujeedooyin laga leeyahay Dad gaar ah."[1]

Jariimada Naceybka ah – *hate crimes* Muslimka (Dambiga Nacebka, Dambi aan Xukunkiisa la hubsan) si loo fahmo waa inuu labadan Shey ee soo socda waafaqsanaadaa:

- Ujeedeedooyinka uu ka leeyahay Dambiilaha inuu Islaamka naco.
- Fal dembiyeedka Dambiilaha ee uu kula kaco Dhibanaha.

1 Tani waa mid ka hadleysa Falal-Dambiyeedka Nacaybka ah – *hate crime* Ujeeddooyinkooda oo ay soo diyaarisay Xafiiska Dimoqraadiga (OSZE) iyo Xuquuqda Baniadamka (ODIHR).

→ Sidaas darted Dambiga Naceybka ah – *hate crime* waa Jariimad ku saleysan Sababo ku kalifaya Naceyb oo kaliya.

Maxeey tahay Ujeedooyinka Xukun aan la hubsan?

Xukun aan la hubsan waa Ujeedo gaar ah oo cad taasoo Qof uu sameeyay. Dambiyada waxa ay udhacaan oo kaliya in Dambiiluhu uu leeyahay Ujeedo Naceyb ah, sidaas darteed ayuu Dadka u dhibaateeyaa. Hadii aanan Ujeedadaas jirin Ficilkaa ma dhaceen!

§ Qodobka 33 ee Xeerka Ciqaabta – „Xaaladaha Ciqaabta Khaaska ah"

Nidaamka Ustariya oo loogu yeero Qodobka § 33 Abs 1 Z 5 waxaa loogu yeeraa "Xeerka Ciqaabta Khaaska ah". Qodobkani wuxuu qeexayaa marka ay jirto Sabab culus oo gaar ah (Dhacdo). Gaar ahaan hadii Dambiilaha …

… „uu dhibaato geystay, dhibaatadaasna uu ula Jeeday Takoorid, Cadaawada loo qabo Ajaanibka ama Sababo kale oo Xumaata ah, gaar ahaan kuwa ka soo horjeeda Koox kamid ah Dadka uu tilmaamayo Qodobka § 283 Abs 1 Z 1 ama Xubin ka mid ah Koox, iyada oo la dhibaateynayo sababtuna ay tahay inuu ka tirsan yahay Kooxda la takoorayo."

Macnaha Asaasiga ee Ustariya, waxaan kasoo qaadaynaa iney Shaqsiyaadka ama Kooxo, kuwaasoo ay ka tirsan yihiin ama ka tirsanaan karaan Kooxda ku xusan Qodobka § 283 Abs 1 Z, waxey noqon karaan kooxdaasi kuwa la kulma Jariimada Naceybka ah – *hate crime* |Jariimada Dhibaateynta.

Micnaha Asaasiga ah ee Jariimooyinka Naceybka ah – *hate crimes* Ustariya waxey u aqoonsan tahay Dambiyo …

„ka hortaga Kaniisad ama Bulsho diineed ama kuwa kale iyada oo loo eegayo qiyaaso maqan ama jira […] Midab, Luqad, Diin, Aragti, Dhalasho, meesha aad ka soojeedo ama qaranimo, Qowmiyad, Jinsi, dhimanaansho Maskaxda ah ama dhimanaasho Jirka ah, Da`ada ama Jihada qalmada".

Waa noocee Dambiyada ay Ustariya u aqoonsatay iney yihiin Dambiyada Naceybka ah *hate crime* – sidoo kale Jariimada Naceybka ah ee ah ka hortaga Musliminta?

- Ka hortaga Musliminta iyadoo Ujeedadeedu tahay in la dhaawaco Jirkooda (Qodobka § 83, § 84, § 85, § 86, § 87 ee Xeerka Ciqaabta)
- Ka hortaga Musliminta iyadoo Ujeedadeedu tahay handadaad halis ah (Qodobka § 107 ee Xeerka Ciqaabta)
- Ka hortaga Musliminta iyadoo Ujeedadeedu tahay wax yeeleynta Hantidooda (Qodobka § 125, § 126 ee Xeerka Ciqaabta)
- Ka hortaga Musliminta iyadoo Ujeedadeed tahay gubniin (Qodobka § 169 ee Xeerka Ciqaabta)
- Ka hortaga Musliminta iyadoo Ujeedadeedu tahay bahdilaad (Qodobka § 115 ee Xeerka Ciqaabta)
- Ka hortaga Musliminta iyadoo Ujeedadeedu tahay in la nacsiiyo Bulshada ama lagu diro (Qodobka § 283 ee Xeerka Ciqaabta)
- Iyada oo lagu hor caayayo meelaha ay Dadka ku badan yihiin sida Dariiqyada iyo/ama Internetka.
- Ka hortaga Musliminta iyadoo Ujeedadeedu tahay in lagu dhibayo Cibaadeysigooda (Qodobka § 189 ee Xeerka Ciqaabta)

Liiskan waxa uu ka kooban yahay oo kaliya Tusaaloyin. Hadii aad la kulantay Dhibaato oo aadan hubin iney Dambi tahay iyo in kale, waxaad Talo ka raadsan kartaa, Hay´ado Talo bixiya waqti kasta

Maxaan sameyn karaa isla marka la´i caayo, la´i bahdilo, la´i handado iyo/ama la´i weeraro ka dib iyadoo ay sababtu tahay Diinta aan rumeys nahay, midabkeyga, arageyga, ama sababtu waa inaan aniga tusaale ahaan Sababo diimeed-dhaqameed aan u Xijaabanahay?

Ka dib marka aad la kulantay Waayo aragnimo ku saabsan Cunsuriyeynta Muslimka, taasoo ah mid horey kor laguugu soo sheegay, waad ka soo dacwoon kartaa adiga oo helaya Taageero isla markaana raacaya Tilaabooyin Sharciga waafaqsan.

Dacwada waxaad u gudbin kartaa…

- si toos ah Boliiska
- si toos ah Dacwo-qaadaha, hadii ay taasi tahay Doorashadaada, ama
- inaad adeegsanayo Hay´ado latalinta ama Ururo Taageero.

Ka hor intaadan Dacwada gudbin, tusaale ahaan, sida Boliiska waxaa kuu suurto gal ah inaad heli karto Latashi-Dacwo gudbin ah. Waxaad heli kartaa Ururo kala duduwan oo ay kamid yihiin ZARA - Zivilcourage & Anti-Rassismus-Arbeit (Geesinimo galinta Bulshada & Ka hortaga-Shaqada-Cunsirinimada), Dokustelle – Islamfeindlichkeit & Anti-Muslimischer Rassismus (Cadaawaynta Islaamka/ Ka hortaga cunsuriyeynta Muslimka), WEISSEN RING, Männer- und Frauenberatungseinrichtungen (Xarumaha Latalinta Raga iyo Dumarka) iyo Xarumaha lidka Takoorka ee Steiermark, Salzburg iyo Kärnten – Talo bixinta, Dacwad gudbintuna waa bilaash.

Hadii si toos ah Dacwad Boliiska ugu gudbisid, waxaad ogaataa, in Dacwadaas aadan dib uga noqon karin ama aadan badali karin.

Hadii aad Dacwad gudbisid, waxaad ogaataa in mar ama laba mar uu Boliiska ku yeeri karo.

Hadii aadan laheyn Codsi gaar ah, waxaa ka tahay Boliiska dhinaciisa Qof Marqaati ah. Taasi micnaheedu waa, ma heli kartid si otomatik ah Xuquuqda oo dhan ee loo yaqaano Xuquuqda „Dhibanaha", taasoo ku xusan Xeerka Nidaamka Dambiyada.

Hadii aad dooneyn ama aadan rabin inaadan Boliiska kaligaa u tagtid, waxaad Xaq uleedahay inuu kula socdo Qof aad ku kalsoonaan kartid. Qofka ku raacaya ama kula socda wuxuu noqon karaa Qof aad macruuf tihiin, Qof aad Qaraabo tihiin ama la Taliye tababaran.

Qofka aad ku kolsoon tahay ee Boliiska kuu soo raaca, kaagama noqon karo Marqaati Falka kugu dhacay, arintaasi maa mid aan la ogoleyn.

Maxaan sameynayaa, hadii (si fudud ama si culus) la ii dhaawaco?

Hadii aad (si fudud ama si culus) laguu dhaawaco adigaa oo ka shakisan iney Ujeedadeedu tahay mid lid ku ah Muslimiinta, oo aad Isbataalka u tagto Daaweyn caafimaad, waxaan kugula talineynaa inaad xafidid Waraaqaha caafimaadka ee lagugu baaray oo dhan.

Marka ugu horeysa, waxaa muhiim ah inaad caafimaaday. Kadib hadii aad dooneysid inaad Dambiilaha Talaabooyin Sharciga waafaqsan ka qaado, waa inaad heysataa Waraaqo caafimaad oo cadeynaya Dhaawaca ku gaaray si ay Marqaati kuugu noqdaan.

Shaqaalaha Isbataalka waxaa Waajib ku ah iney Dacwo gudbiyaan, hadey daaweeyaan Qof sheeganaya in Qof kale uu Dhaawaca ugeystay.

Sida caadiga ah, Shaqaalaha Isbataalka marka ay Dacwada Boliiska ugudbiyaan, Boliiska si dhaqso ah ayuu kuula soo xiriiri doonaa, si ay kuu wareystaan. Hadii aaney dhicin in Boliisku kula soo xiriiro waxaad heysataa Furad aad adigu kula xiriiri karto Boliiska, si aad ugu sheegto wixii kugu dhacay iney ahaayeen Ficilo ka dhan ah ama lid ku ah Muslimiinta.

Ugu horeyntii ka taxadar Caafimaadkaaga, ka dib marka aad bogsato, waxaan kugula Talineynaa inaad si dhaqso ah u bilowdid Bayaankan !

Kaligaa waad u tagi kartaa Boliiska waadna ka dalban kartaa iney Dacwo kuu qoraan. Hadii aadan dooneyn ama rabin inaad kaligaa Boliiska u dacwooto ama aadan ku qanacsaneyn, la xiriir Ururada Latalinta waqti walba – sida ZARA – Zivilcourage & Anti-Rassismus-Arbeit (Geesinimo galinta Bulshada & Ka hortaga-Shaqada-Cunsirinimada), die Dokustelle – Antimuslimischer Rassismus & Islamfeindlichkeit (Ka hortaga cunsuriyeynta Muslimka & Cadaawaynta Islaamka), Frauen - und Männerberatungseinrichtungen (Xarumaha la talinta Raga iyo Dumarka) iyo Xarumaha lidka Takoorka ee Steiermark, Salzburg ama Kärnten - Doono ama raadso in lagula taliyo, lagu Taageero ama lagu raaco.